# WARBIXIN KU SAABSAN DIB – UDEJINTA MAREYKANKA

Howlaha dib-udejinta Mareykanka waa howlo socda ee qaadan kara bilooyin ama sanooyin. Dib-udejinta Mareykanka waa hawl iskaa –wax u qabso ah, waana inay qaxootiga nafsaddooda go'aan ka gaaraan haddiii u guuritaanka Mareykanka uu yahay mid u haboon iyaga iyo qoysaskoodaba. Fulinta howlaha dib-udejinta waa lacag la'aan. Balse haddii lagu ogolaado waxaa lagaa codsanayaa inaad saxiixdo warqad balan qaadid ah, ee la yiraahdo (Promissory – note) oo ah qarashkii tikidhada adiga iyo qoyskaaga iyo inaad dib u bixin doonto muddo kadib goortii aad Mareykanka tagto.

Howlaha dib-udejinta Mareykanka waxay isugu jiraan kulano warbixineed oo taxan oo aad la yeelaneyso hay'addo kala duwan. Codsadayaasha badankooda marka ugu horeyso waxay kulan warbixin la yeelanayaan xafiiska UNHCRta. Haddii xafiiska UNHCRta ogolaato in qadiyadaada u gudbiso Mareykanka waxaad kulan warbixin kale la yeelaneysaa shaqaale ka imanayo dibedda oo la yiraahdo OPE oo u fulinayo howlaha Wasaarada Arimaha Dibedda ee Mareykanka, dabadeedna waxaa imanayo shaqaale ka socda Qeybta Nabadsugidda Qaranka (DHS). Waa inaad soo xaadirtaa kulan waliba oo warbixin ah. Qeybta Nabadsugidda Qaranka (DHS) oo keliya ayaa go'aanka kama dambeysta ah ka gaari kara haddii dib-laguu dejinaayo Mareykanka iyo haddii kale.

Waxaa muhiim ah inaad ka jawaabto su'aalaha UNHCRta, OPEda iyo DHSta si run iyo daacadba ah. Haddii aad ka weecato inaad sidaa sameeyso waxay wax u dhimi kartaa natiijada qadiyadaada ama xaalada degenaanshahaaga Mareykanka haddii lagu ogaado mustaqbalka. Warbixintii lagaa qaaday waxaa loo xafidi doonaa si qarsoodi iyo sir ah. Jihooyinka keliya ee warbixintaada lala qeybsan doono waxay tahay hey'addaha kugu saacidayo howlahaaga dib-udejinta kuwaasoo u baahan karo warbixintaada.

Sababo badan awgeed, DHSta qaraar deg deg ah kama gaari karto qadiyadaada, sidaa daraadeed haddii ay waxyaabo iska bedelaan xaaladaada wadanka aad qaxootiga ku tihid amaba dhinaca xaalada qoyskaaga, sida:- dhimasho, dhalasho, guur ama furiin, amaba aad dooneyso inaad ku laabato wadankaagii hooyo intii ay howlaha dib-udejinta kuu socdaan, amaba aad bedesho lambaradii lagaala soo xiriiri jiray ama cinwaankaaga, waa inaad la socodsiisaa UNHCRta ama OPEda sida ugu dhaqsaha badan.

Haddii aad go'aansato inaad ka talo baxdo dib-udejinta Mareykanka intii ay howlaha kuu socdaan, dib waad ula noqon kartaa dalabkaaga adigoo wargelinayo UNHCRta ama OPEda. Haddii DHSta ogolaato dalabkaaga dib-udejinta Mareykanka waxaa lagaa doonayaa inaad marto baaritaan caafimaad, taasoo ay isku-dubarideyso hay'adda caalamiga ee hijrada (IOM), ama dhaqtar ay xilsaartay safaarada Mareykanka. Natiijada baaritaanka caafimaadka waxay dib u ridi kartaa safarkaaga Mareykanka qaas ahaan haddii cudur kugu soo baxo, ama xaaladaada ay tahay in lagaa daaweeyo intii aadan dhoofin, sida cudurka qaaxada ama TBda.

Daaweeyntaada oo si guul ah ku dhamaato waxay kuu suurogelineysaa in aad safarkaaga hore ugu sii socoto. Waxaa muhiim ah inaad si run ah uga jawaabto su'aalaha uu dhaqtarka ku weydiinayo goortii aad mareyso baaritaanka caafimaadka taasoo suurogelineyso in go'aan fiican laga gaaro daaweynta aad u baahantahay goortii dib laguu dejiyo Mareykanka.

Iyadoo ay ku xirantahay sidii aad ugu soo biirtay barnaamijka dib-udejinta, hadana lagama maarmaan ma aha inaad qof ka taqaano Mareykanka, balse haddii aad ku qabto dad qaraabo ah Mareykanka aadna dooneyso in dib laguula kulmiyo, waxaa muhiim ah inaad la socodsiiso OPEda sida ugu shaqsaha badan markii aad bilaabeyso howlahaaga dib-udejinta.

Warbixintani ayaa ah mid si aad iyo aad ah uga faa'ideysaneyso sidii aad u qorsheyn lahayd imaashahaaga wadankan. Wax waliba wixii awood ah ayaa la sameyn doonaa sidii laguu dejin lahaa isla magaalada ay qaraabadaada horey ugu noolaayeen Mareykanka. Inkastoo taasi aan la damaano qaadeyn.

Fadlan, la soco guursashada hal xaas ka badan waa sharci darro Mareykanka.

Qoys waliba oo qaxooti ah waxaa loo xilsaari doonaa hay'ad aan xukuumi ahayn oo hawlo gar gaar ah siin doonta imaashadooda Mareykanka. Gargaarka ugu horeeya aad heleysid ayaa ah guri-dejin iyo in guriga alaabo laguu dhigo iyo maacuunba kuwaasoo aasaasi ah. Waxyaabo badan oo gurigaaga ugu horeeya laguu dhigayo ayaa laga yaaba in ay yihiin waxyaabo mustacmal ah amaba sidaa aan qaali u sii ahayn. Laakiinse wax waliba wixii laguu dhigayo waa nadiif iyo wax xaaladiiisu ay wanaagsan tahay oo weli la isticmaali karo.

Waxaa muhiim ah inaad iskaashi la yeelato hay'adda dib-udejinta adigoo tixraacayo qorshaha dib-udejinta ee laguugu talo galay. Waxaa laguugu saacidi doonaa shaqo raadinta meel waliba oo lagu dejiyo.

Mareykanka helitaanka shaqo waxay qaadan kartaa muddo, shaqadaada ugu horeeysa waxaa laga yaabaa in ayan ahayn shaqadii aad ku soo taqasushay ama middii aad ku heysan jirtay wadankaagii hore, balse waxay noqon kartaa mid biloow ah oo aan qibrad u baahneyn ama xitaa waxay noqon kartaa mid ku meel gaar ah ama saacadaha la shaqeeysto barkiisa ah.

Qiimaha maciishada iyo gaargaarka dadweynaha wuu kala duwan yahay gobolada Mareykanka, taasi macnaheeda waa gargaarka lagu siinayo lama mid noqon karo midka la siinayo qaxootiga degen gobolada kale.

Gaadiiidka dadweynaha waa laga heli karaa magaalooyinka badankooda. Gaari aad ku socoto laguma siinayo, taasi kama mid aha gaargaarka howlaha dib-udejinta.

***TIXGELINTA WARBIXINO DHEERAAD AH EE NOLOSHAADA MAREYKANKA KU SAABSAN***:-

Mareykanka oo laguu ogolaado in aad ku tagto si qaxootinimo waxay ku suurto gelineysaa in aad wadankaas si joogto ah ugu noolaato, ugu dambeystiina waxaad dalban kartaa dhalashada Mareykanka. Go'aankaaga in dib laguu dejiyo Mareykanka kaama hor istaagayo suurogalka inaad wadankaaga hooyo ku laabato waqti waliba, Balse taasi waxay wax u dhimi kartaa xaaladaada Mareykanka.

Mareykanka waa wadan kala duwan, tirada shacbigeedana wuxuu ka badan yahay 300 milyan qof. Waxaana ku nool bulshooyin cirqiyo kala duwan leh. Mareykanka badidooda waxay la degan yihiin bulshooyin isku dhafan. Taasi waxay macnaheeda tahay deriskaaga iyo shaqsiyaadka aad la shaqeyso iyo

kuwa aad wax isla barataanba waxay yihiin kuwo midabyo, diimo iyo cirqiyado kala duwan ah, heystana dhaqamo kala duwan iyo hab nololeed.

Qaxootiga waxay leeyihiin xuquuq la mid ah xuquuqda dadka kale ee ku nool Mareykanka taasoo ka mid ah:- xornimada hadalka, diinta, xornimo urureed iyo xornimo dhaqdhaqaaq. Laguma xeri karo ama xabsi laguma dhigi karo inaad muujiso ama ka hadasho fikradaada siyaasadeed iyo inaad diintaada ku dhaqanto ama kulan aad la yeelato kooxo saaxiibadaada ka mid ah.

Dadka Mareykanka badankooda waxay qiimeeyaan howlkarnimada iyo isku filnaanshaha. Waxayna rajeynayaan in dadka cusub ee ku soo biirayo si dhaqso ah shaqooyin u helaan, nafsadoodana wax u taraan iyo qoysaskoodaba, lacagta cadaanka ama kaashka iyo gargaarka kale ee xukuumada bixiso si fiican uguma filna qoysaska.

Aqoonta luqada ingiriisiga waa muhiim si aad guul u gaarto Mareykanka. Waad heli kartaa shaqooyin haddii aadan luqada aqoon, laakiinse fursadahaaga oo shaqooyin fiiican aad ku hesho ayaa aad u yaraan doona, waxaa jira fursado aad ingiriisiga ku baran karto bulsho waliba, hase yeeshee waxaa lagaa rajeynayaa inaad hadana shaqeysato.

Waxbarashada waa lacag la'aan laga bilaabo xanaanada caruurta ilaa fasalka labo iyo tobnaad. Waxbarashada waa waajib laga bilaabo carruurta 6jirka ilaa 16jirka ee gobolada badankooda Mareykanka.

Haseyeeshee waalidka way ka qori karaan carruurtooda iskuulo qaas ah, kuwaasoo ah iskuulo diinta la xirriira, laakiinse lacagta waxbarashada iskuuladaasi waa qaali.

Qiimaha waxbarasho jaamacadeed waa wax adag, sidaa daraadeed arday badan oo jaamacadda dhigata ayaa shaqeeya si ay isaga bixiyaan qarashkii jaamacadda amaba raadsada deeq-waxbarasho ama deyn ka qaata bangiyada iyagoo iska gudi doona markii ay jaamacadda ka qalin jebiyaaan.

Qaxootiga dib loo dejinayo Mareykanka waxay xaq u leeyihiin ugu yaraan 8 bilood gargaar caafimaad ah oo xukuumada ay bixineyso. Mareykanka gargaarka caafimaadka waa qaali, shaqsiyaadka iyaga ayaa ka mas'uul ah inay iska bixiyaan gargaarkooda caafimaad. Xukuumada kama mas'uul aha. Hase yeeshee kuwii aanan qabin damaanad caafimaad looma diidayo in gargaarka degdega ah loo fidiyo.

Dadka badankiisa waxay ku tiigsan yihiin barnaamijyo damaanad caafimaad ah, qarashkaasoo qeyb ka mid uu bixinayo shaqaaleeyahooda, Laakiinse shaqooyin badan oo biloow ah ama hooseeya ma bixiyaan damaanad caafimaad.

Isbedelkii ugu danbeeyey ee la sharciyeeyey Mareykanka oo dhinaca nidaamka gargaarka caafimaadka ah ayaan aheyn mid aan shaqeyn doonin sanooyinka yar ee fooda inagu soo hayo.

Qaxooti badan oo dib loo dejiyay Mareykanka ayaa ka warbixiyay in waxa ugu adag uu yahay sidii la isugu hagaajin lahaa kala duwanaanta dhaqanka, gaar ahaan doorka dumarka iyo ragga ee mas'uuliyadda qoyska. Qoysas badan ayaa ah in ninka iyo xaaskiisa shaqeeyaan,

Tusaalooyin badan waxaa ka mid ah in caruurta luqada ingiriisiga si fiican u bartaan lana qabsadaan nolosha Mareykanka si ka dhaqso badan waalidkooda.

Howlaha isku hagaajinta dhaqamada iyo isbeddelo kaleba ayaa u sababi kara murugo, welwel iyo walaac shaqsiyaadka iyo qoysaskoodaba, sidaa daraadeed waa inaad gargaar ka codsataa hay'adda dib-udejinta hadii xaaladaasi aad la kulanto.

Ku dhowaan 3 milyan oo qaxooti ah ayaa imaaday Mareykanka 35tii sanno ee ugu danbeeyey.

Dib-udejinta wadan waliba oo cusub ayaa ah mid aad kala kulanto xujooyin badan, laakiinse qaxootiga badanaaba waxay si guul ah ula qabsadeen dhaqanka bulshadooda cusub waxayna u heleen fursado nafsadooda iyo qoysaskoodaba.